IIB MA GALO

# الجريدة الرسمية

# FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad Muqdisho, 1 Diseembar 1978 L. 12

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

SHARCI
W. M.

### QAYBTA LABAAD
XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S, L. 83 ee 18 Okt. 78, Xeer Nidaamiyadda Guddiga Maamulka Dawladda Hoose Bogga 768

XEER WASAARADDA H. GUUD, L.84 ee 12 Okt. 78, Dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey Jaalle Xaaji Naasir Cali-ku yaal Muqdisho Degmada Shibis-kuna Fadhiya mq. 1.5000/- » 773

XEER WAS. H. GUUD, L. 85 12 Okt. 78, Dhul la siiyey, gacantana loo geliyey Jaalle Xaaji Xaaji Naasir Cali-ku yaal Muq. Degmada Kaaraan-kuna fadhiya mq. 608/- » 775

XEER WAS. H. GUUD, L. 86 12 Okt. 78, Dhul Dawladeed la siiyey gacantana loo geliyey Jaalle Xaaji Naasir Cali-ku yaal Muq. Degmada Kaaraan-kuna fadhiya mq. 1.850/- » 777

## QAYBTA SADDEXAAD
## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

Wasaaradda H. Guud 25 Luuliyo 78, Naado Dhul
Jaalle Faaduma Cabdalla Ciyoow L. 657 » 779

Wasaaradda H. Guud 25 Luuliyo 78, Naado Dhul
Jaalle Canab Xaaji Yaasiin L. 658

Wasaaradda H. Guud 25 Luuliyo 78, Naado Dhul
Jaalle Aamina Axmed Jaamac L. 569 » 780

Wasaaradda H. Guud 25 Luuliyo 78, Naado Dhul
Jaalle Maxamed Faarax Cigaal L. 660

Wasaaradda H. Guud 25 Luuliyo 78, Naado Dhul
Jaalle Maana Cali Axmed Xabiib L. 661 » 781

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Caasha Cusmaan Diini L. 662

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Dhul Jaalle Cabdi Maalig Maxamuud L. 663 » 782

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Maryan Shaaciye Cabdulle L. 664

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Salaado Yuusuf Cusmaan L. 665 » 783

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Keyra Xaaji Cabdi L. 666

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Maxamed Saalax Macallim L. 667 » 784

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Safiya Sheekh Nuur L. 668

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Cali Xaaji Dagaal L. 669 » 785

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Timira Maxamuud Cabdi L. 670

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Xaawa Nuur Cismaan L. 671 » 786

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Xuseen Axmed Maxamed L. 672

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Cabdulqaadir Maxamuud Maxamed L. 673 » 787

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Safiya Axmed M. Maxamuud L. 674

Wasaaradda H. Guud, 8 Agoosto 78, Naado Dhul
Jaalle Xasan Qaasim Subeer L. 675 » 788

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.11.78,
Lumid Jeeg War. Lamb. 206482 oo ku qoran Shs. 5.900/- uu leeyahay Cabdi Maxamuud Cabdi L. 676 » 789

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 30.11.78,
Lumid Jeeg War. Lamb. 2341 ku qoran Shs. 24.000/- ay leedahay Khadiija Caabe Oodowaa L. 677 » 790

Maxkamadda Gobolka Banaadir 1.11.78, lumid Buug Keyd L. 499 ku qoran Shs. 10.600 ay leedahay Faaduma Faarax Cawaale L. 677/Bis » 791

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13.11.78,
Lumid Buug Kayd L. 10827 ku qoran Shs. 3.144 uu leeyahay Yaxye Cumar Mardhuuf L. 677/Bis » 792

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWAYNAHA J.D.S. L. 83 ee 18 Okt. 78, Nidaamyadda Guddiga Maamulka Dawladda Hoose:

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

MARKUU ARKAY : Sharciga lamb. yahay 121 ee 17-9-72;

MARKUU ARKAY : Sharciga lamb. yahay 23 ee 18-7-74;

MARKUU ARKAY : Qod. 5aad ee sharciga lamb. yahay 21 ee 3-2-77;

ISAGOO ARKAY : Lagama maarmaan in guddiga maamulka loo sameeyo nidaam caddeynaya hawlahooda, gaar ahaan tilmaamaya xilkooda iyo awooddooda;

**WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA QODOBBADIISU HOOS KU QORAN YIHIIN :**

Qodobka 1aad

Dhismaha Guddiga

Guddiga maamulka D/Hoose waa guddiga talis ahaan ugu sarreeya dhammaan maamulka iyo hoggaaminta hawlaha kala duwan ee D/Hoose wuxuuna ka koobmaa xubnaha hoos ku qoran :

| | |
|---|---|
| 1. Duqa Magaalada Muqdisho | Guddoomiye |
| 2. Ku-xigeennada Duqa Magaalada Muq. | Xubno |
| 3. Guddoomiyaha Gud. Shaq. D/Hoose | Xubin |

Qodobka 2aad

Sharci ahaan guddoomiyaha guddiga maamulka waxaa noqon kara oo keliya qofka haya jagada Duqa Magaalada Muqdisho markii uu maqan yahay ama uusan xilkiisa gudan karin, waxaa xilka guddoomiyannimada sii qaban doona qofka ku meel gaarnimada ku haya jagada Duqa Magaalada Muqdisho, ama ciddii uu asagu wakiisho.

Qodobka 3aad

Fadhiyada

1. Guddigu si uu u guto xilkiisa qarannimo isla mar ahaantaasna u daryeelo danaha guudnimo waa inuu muddo ka yarayn asbuuciiba mar ka fariistaa hawlaha hor yaal ee socodsiintoodu ku xiran tahay go'aan ka gaaridda guddiga.

Haddii arrin xallinteedu deg-deg tahay ay la soo gudboonaato, guddoomiyuhu wuxuu awoodi karaa inuu xubnaha guddiga intooda kale isugu yeero kulan aan fadhigiisu caadi ahayn.

Qodobka 4aad

Cod dhiibashada

1. Xubnaha guddigu waxay xaq u leeyihiin iney ra'yi ka dhiibtaan arrin kastoo markaas xallinteedu hor taalo guddiga, ugu dambeystana waxaa go'aankii guddiga arrintaas uu ka gaaray loo aqoonsan doono ra'yigii xubnaha badankoodu codkooda siiyaan.

2. Inta doodaha guddigu socdaan waa in qoraal lagu sameeyo wax allaale wixii rayi ah ee ka soo ifbaxa doodaha guddiga, kadibna laga soo saaraa war qoran, kaasoo noqon doona saldhiggii go'aanka kama dambeysta ee guddiga.

3. Waxaa go'aankii guddiga sharci ahaaneed loo aqoonsan karaa oo keliya go'aankii shuruudihiisa lagama maarmaanka ah ay kaamil noqdeen, isla markaasna ka soo fulay fadhi ay ka soo qayb galeen ugu yaraan saddex ka meelood laba xubnaha guddiga oo dhan.

4. Guddigu kama doodi karo, awoodna uma laha inuu go'aan ka gaaro arrimo asalkoodu khilaafsan yahay qawaaniinta, shuruucda iyo xeerarka u degsan Dawladda Hoose ee Muqdisho, guud ahaana wax u dhimaya shuruucda dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed.

Qodobka 5aad

**XILKA GUDDIGA**

1. Xil gudashada guddigu waxay had iyo jeer ahaan doontaa mid waafaqsan barnaamijka Dowladda iyo qorshaha Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, lana socon karta baaqa ku xusan Xaashida 1aad, 2aad, 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii, gaar ahaan guddiga maamulka wuxuu u xil saaran yahay :-

b) Horumarinta barnaamijyada maamulka D/Hoose ugu daryeelayso bulshada ku dhaqan gudaha iyo soohdimaha uu ka kooban yahay G/Banaadir.

t ) Kobcinta, sare u qaadidda dhaqaalaha iyo dakhliga D/hoose ee Muqdisho,

j ) soo hoynta cashuuraadka sharci ahaaneed ee D/hoose,

x ) ilaalinta iyo dayactiridda hantida D/hoose ee Muqdisho.

kh) daryeelidda iyo isu xiriirinta halka ujeeddo ee dha-

d ) socodsiinta dhammaan hawlaha D/hoose ee Muqdisho

Qod. 6aad

Awoodda Guddiga

Guddigu si uu u guto waajibaadkiisu ballaaran wuxuu leeyahay awoodda hoos ku qoran:-

1. iney tala ka dhiibtaan wax alaale wixii la xiriira xeer cusub dejin ama wax ku kordhin, wax ka dhimid iyo baabi'in xeerarka, nidaamyada iyo amarada saameeya D/hoose ee Muqdisho.

2. iney rayi ku kordhiyaan ama ka dhimaan inta aan la soo ogolaan miisaaniyadda sannadka D/hoose ee Muqdisho,

3. iney qorsho ahaan kala doortaan mashaariicda iyo hawlaha hadba markaas ku habboon ama astaahila in loogu daneeyo mujtamaca ku nool gobolka Banaadir,

4. iney go'aamiyaan kharaj kastoo lagu fulinayo dhamaan mashaariicda guud ahaaneed,

5. iney go'aamiyaan kharajyada la xiriira magdhowyada, cawil celinta iyo kaalmada ee hadba la soo gudboonaada maamulka D/hoose ee Muqdisho,

6. iney go'aamiyaan Iibsashada qalab kastoo danta D/hoose u baahnaato,

7. iney go'aamiyaan abuuridda ila ganacsi haddii danta D/hoose ay u baahnaato,

8. iney ka hor tagaan wax alaale wixii lid ku ah danta D/hoose ee Muqdisho iyo danta dadweynaha ku nool G/Banaadir,

9. iney hubiyaan fulitaanka dhamaan hawlaha D/hoose se ee Muqdisho,

10. iney go'aamiyaan arrimaha la xiriira shaqo ka tegidda

11. iney go'aamiyaan arrimaha la xiriira dallacaadda, gunnooyinka, abaal gudyada iyo tallaabo kastoo saameeysa danta shaqaalaha D/hoose ee Muqdisho, ayagoo mar walbana raaci doona shuruudaha ku xiran dallacaadda ee ku xusan qod. 31aad ee sharciga lam. yahay 28 biis ee 21.2.'76.

12. iney guddi u magacaabaan arrimaha khuseeya qandaraasyada ee had iyo jeer la soo gudboonaada maamulka D/hoose ee Muqdisho,

13. iney wax alaale wixii alaab ah ee waaxuhu soo iibsanayaan u magacaabaan guddiga iibinta waaxyaha D/hoose ee Muqdisho,

14. iney go'aamiyaan wax alaale wixii alaab ah ee qiimahoodu dhaafaya Sh.so. 5000 ee D/hoose ka soo iibsanayso suuqa bannaan,

15. iney qaar ama kuligeedba ka masaabaxaan qof cashuur D/hoose ku leedahay, haddii ay sugnaato in qofkaasu maskiinimo, gablannimo, waayeelnimo iyo jirro awgeed uusan awoodi karin bixinta cashuurtaas sida uu qabo qod. 9aad ee sharcga lam. yahay 43 ee 23.9.77.

16. iney qof ganaax ka masaabaxaan qaar ama kulligiisaba haddii dantu sidaas kula habboonaato,

Qod. 7aad

Arrinta ku tilmaaman xarafka 11aad, Qod. 6aad ee isla nidaamkan haddii qof shaqaalaha ka tirsan uu muujiyo astaahilid dheeraad ah Duqa Magaaladda Muqdisho, wuxuu tusaaleyn karaa in dallacaad, gunno ama amaal gud, loo tixgeliyo, ayadoon lagu xirin go'aanka guddiga maamulka D/hoose ee Muqdisho sida ku cad qod. 31aad, (x.kh,) ee sharciga lam. ahay 28 biis ee 21.2.76.

Qodobka 8aad

Arrinta ku tilmaaman Xarafka 16aad ee isla nidaamkan ka sokow Duqa Magaalada wuxuu awoodi karaa in qof ganaax ka masaabaxo, aydoon ku xirneyn go'aanka guddiga maamulka ee D/Hoose ee Muqdisho.

Qodobka 9aad

Guddiga si xil gudashadiisu suura gal u noqoto wuxuu kaalmaysan karaa Wasaaradaha, Wakaaladaha, Hay'adaha iyo cid allaale ciddii dantu ka maarmi weyso.

Qodobka 10aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S;

Qodobka 11aad

Wax allaale wixii xeerkan ka soo hor jeeda ama lid ku ah fulitiisa waa la baabi'iyey.

Muqdisho 18 Okt. 1978

(MADAXWEYNAHA J. D. SOOMAALIYA)

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 84 ee 12 Okt. 78, Dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey Jaalle XAAJI NAASIR CALI - ku yaal Muqdisho - Degmada Shibis - kuna fadhiya mq. 1.500.-

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1da Luuliyo 1976, kuna saabsan Habka Maamulka Guud ee Dawladda oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxday 1da N fembeer 1973. Sharciga dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer Dowladeed lamb. 15083 taariikhda markay ahayd 2-2-1939 laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Soomaaliya Italiana lamb. 8 ee 30-4-1939, taas oo lagu siiyey NEBULON PAOLO iyo GERANIO VITOORE cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mq. 2.533,16/- kuna yaal Muqdisho - Deegmada Shibis ;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda, taariikhdeeduna ahayd 15 Jannaayo 1938, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Dowladdu ;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijintii Farsamada Sah. Abuukar Maxamed Sheekh kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Deegaanka Mag. ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 5-7-1978 taas oo caddeyneeysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha taariikhdu markay ahayd 15-1-1938 laguna xaqiijiyty sida ay naqshadda guriga waafaqsan tahay ;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanta (Nulla Osta) degsiimada guriga ku dhisan Xamar Degmada Shibis - laguna siiyey warqadda lamb. yahay 260 taariikhdeeduna tahay 5 Luuliyo 1978, Dowladda Hoose ee Xamar oo caddeyneysa in guriga waafaqsan tahay naqshadda ;

ISAGOO ARAKAY : Qoraalka rayadka ah (Scrittura privata laguna bixiyey xeer iyo xisiba, taariikhdeeduna aheyd 21 Sebteember 1939 laguna diiwaan geliyey Xamar lamb. 479 Mod. II - Vol. I - Atti Priv. il 26-9-39 taas oo GERANIO VITTORE iyo NEBULON PAOLO wuxuu ka gadeen kuna wareejiyeen SAID MOHAMED BIN QUER wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhulka ku fadhiya mq. 2.533,16/- kuna yaal Muqdisho - Degmada Shibis;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (Atto) lamb. 4732 Rep. taariikh. 30-3-1957 lagu diiwaan geliyey Xamar 1da Abriil 1957 al N. 231 Atti Pubblcii Vol. VIII° oo ah caddeynta Notaayada Mario Ciotola taas oo SAID MAXAMED BIN QUER oo u ah wakiil XAAJI CALI MAXAMED BIN QUER wuxuu ka gaday kuna wareejiyey XAAJI NAASER CALI MASLAX, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhulka ku fadhiya mq. 1.500/- kuna yaal Muqdisho - Degmada Shibis;

ISAGOO AQOONSAN : In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsan siismaha iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaalaha cadka dhulka (Dekreeto di libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saarayaa :

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacntana loo geeliyey loona aqoonsaday XAAJI NAASIR MUSLAX, dhul ku fadhiya mq. 1.500/- kuna yaal Muqdisho - Degmada Shibis.-

Muqdisho, 12 Okt. 1978.-

WASIIRKA WASSARADDA H. GUUD
W.S. Inj Maxameed Xawaadle Madar

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 30
Muqdisho, 23 Okt. 1978
Ku Xigeenka Hantidhowrka Guud
Sax. Xuseen Cabdulle Cali.-

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD L. 85 ee 12 Okt. 78 Dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey Jaalle Xaaji Naasir Cali ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan kuna fadhiya mq. 608.

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1da Luuliyo 1976, kuna saabsan Habka Maamulka Guud ee Dawladda oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxday 1da Nofembeer 1973. Sharciga dhulka dhismaha;

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Sahanka iyo Degaanka Mag.

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennayo 1967

ISAGOO ARKAY : Arjigii uu keensaday XASAN MUSSA MAXAMED taariikhdu markay ahayd 29.6.1961, kuna weydiistay dhismo cad dhul dawladeed, ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan;

ISAGOO AQOONSAN : Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajyey looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 3477, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho fadhigoodii 14aad taariikhdeeduna ahayd 31 Oktoobar 1967 kuna saabsan dhismo garaash kuna fadhiya mq. 608;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. 96590 ee 4.11.1967, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeynaysa in XASAN MUSSA MAXAMED uu bixiyey lacag dhan Sh.so. 611,50 kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN : Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 608loona tiriyey XASAN MUSSA MAXAMED sida ku cad warqadda siismada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 14.11.1967;

ISAGOO ARKAY : Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaamaysa dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijintii farsamada Sah. Abuukar Maxamed Sheekh kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta taariikhdeeduna ahayd 5.7.1978, taas oo caddeynaysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha Dowladda Hoose taariikhdu markay ahayd 31 Oktoobar 1967 laguna xaqiijiyey sida ay naqshadda guriga waafaqsan tahay kuna fadhiya mq. 608

ISAGOO ARKAY : Oggolaanta (Nulla Osta) degsiimada guriga ku dhisan Xamar Degmada Kaaraan laguna siiyey warqadda lamb. yahay 257 taariikhdeeduna tahay 5.7.1978 ee Dowladda Hoose ee Xamar oo caddeyneysa in dhismaha waafaqsantahay naqshadda;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (ATTO) lamb. 11.351 Rep. taariikh. 18 Nofeembar 1967 lagu diiwaan geliyey Xamar 22.1.1967 L.842 Atti pubblici Vol. 18 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Maxamed Warsame Cali taas oo XASAN MUSSA MAXAMED ka gaday kuna wareejiyey XAAJI NAASIR CALI wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 608 kuna yaal Muqdisho Degmada Kaaraan;

ISAGOO AQOONSAN : In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dowladeed (Concessione e conseguente libera disponibilita oo ay ujeeddadeediisu aheyd dhis, wuxuu soo saarayaa

## X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday XAAJI NAASIR CALI (Dekereeto di libera disponibilita) dhul ku fadhiya mq. 608 kuna yaal Muqdisho Degmada Kaaraan.

Muqdisho 12 Okt. 1978

WASIIRKA WASSARADDA H. GUUD

W.S. Inj Maxameed Xawaadle Madar

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 30

Ku Xigeenka Hantidhowrka Guud

Sax. Xuseen Cabdulle Cali.-

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD L. 86 ee 12 Okt. '78 Dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey JAALLE XAAJI NAASIR CALI - ku yaal Muqdisho - Degmada Kaaraan - kuna fadhiya mq. 1.850.-

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1da Luuliyo 1976, kuna saabsan Habka Maamulka Guud ee Dawladda oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxday 1da Nofembeer 1973. Sharciga dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 115 soona baxday 13 Sebteembar 1956 ;

ISAGOO ARKAY : Arjigii uu keensaday XAAJI NAASIR CALI taariikhdu markay ahayd 7.1.1958, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho - Degmada Kaaraan.

ISAGOO AQOONSAN : Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyey looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 5780, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho - fadhigood 329aad taariikhdeeduna ahayd 13 Abriile 1964, kuna saabsaneed dhismo maqsan garaash iyo xafiis - kuna fadhiya mq. 1.850 ;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. 154 ee 2 Agoosto 1960, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in XAAJI NAASIR CALI uu bixiyey lacag dhan Sh.o. 1.850/- kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey ;

ISAGOO AQOONSAN : Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.850/- loona tiriyey XAAJI NAASIR CALI sida ku cad warqadda siismada dhulka (Verbale di Consegna) taariikhdeeduna ahayd 19 Febbaayo 1961 ;

ISAGOO ARKAY : Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameysa dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijintii farsamada Sah. Abuukar Maxamed Sheekh kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta, taariikhdeeduna ahayd 5.7.1978, taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadaan Guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikhdu markay ahayd 13 Abriil 1964 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay kuna fadhiya mq. 1.850;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanta (Nulla osta) degsiimada guriga ku dhisan Xamar Degmada Kaaraan laguna siiyey warqadda lamb. yahay 259 taariikhdeeduna tahay 5 Luulyo 1978 ee Dowladda Hoose ee Xamar oo caddeyneysa in guriga waafaqsan tahay naqshadda;

ISAGOO AQOONSAN : In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsan siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladeed (Concessione e conseguente libera Disponibilita) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, wuxuu soo saarayaa

## X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday XAAJI NAASIR CALI (Dekereeto di libera disponibilità) dhul ku fadhiya mq. 1.850/- kuna yaal Muqdisho - Degmada Kaaraan.-

Muqdisho, 12 Oktoobar 1978.-

WASIIRKA WASSARADDA H. GUUD
W.S. Inj Maxameed Xawaadle Madar

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 30
Muqdisho, 23 Okt. 1978
Ku Xigeenka Hantidhowrka Guud
Sax, Xuseen Cabdulle Cali.-

## QAYBTA SADDEXAAD
## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
### NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Cabdalla Ciyow ay soo qoratay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 6-7-78 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu waa Trabesiyo Addimihiisuna waa (40+50)X60 Kuna fadhiya 2700 Mq.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA**

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
Bari waxaa ka xiga : Waddada ka timid N.U.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho 25 11.78

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalnaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 657

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
### NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Canab Xaaji Yaasiin ay u soo qoratay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta maalintii taariikhdu ahayd 6.5.78 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 6.5.78 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu waa Retangolar Addimihiisuna waa 40X20 Kuna fadhiya 800 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Gal lam. 336/60
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Gal lam. 48/58
Bari waxaa ka xiga : Gal. lam. 1266/59.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 25 Luuliyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXADA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Aamina Axmed Jaamac ay u soo qoratay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 24.6.78, ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Cabdul-casiis Qaabkiisuna waa Retangolare Addimihiisuna waa 40X20 Kuna fadhiya 800 mq.
— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa xiga : G. L. 357/61
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : G.L. 98/73
Bari waxaa ka xiga : G.L. 12/62.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 25 Luuliyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyoDeg. Magaaleynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 659

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Faarax Cigaal uu soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 9.5.78, uu ku weydiihtay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Cbdulcasiis Qaabkiisu waa Trabesiyo Addimihiisuna waa (34+30)X30 Kuna fadhiya 960 Mq.
SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed
Bari waxaa ka xiga : Waddo.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 25 Luuliyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 660

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maana Cali Axmed Xabiib ay u soo qoratay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 3.7.78, uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu waa Trabesiyo Addimihiisuna waa (30X28)X30 Kuna fahiya 750 Mq.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA**

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : G. Lamb; 657/78
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed
Bari waxaa ka xiga : Waddo.

Qofkii daneynayaa dhulkaas wuxuu s i fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana doodi karaa (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 25 Luuliyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 661

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA**
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Maalig Maxamuud Cali uu soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 5.1.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Retangolare Addimihiisuna waa 40X30 Kuna fadhiya 1200 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lam. 495 - 497 Y
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 494 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 500 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 8 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynt
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 662

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**WAAXDA SHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA**
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Cusmaan Diini ay soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 5.1.77 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 1200 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lam. 496-498 Y
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo 21ka Oktoobar
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 493 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 499 Y

Qofkii Daneynayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arji karaa Naqshadda dhul oo taal waaxda Sah. & Deg. Magaalaynta ee W.H.G waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga faafinta rismiga ah:

Muqdisho, 8 Agoosto 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEGAANKA MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN C. GUULEED

L. 663

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**WAAXDA SHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA**
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maryan Shaaciye Cabdulle ay soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 15.9.76 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 Mq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS QORAN —
Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lam. 2039 Y
Koonfur waxaa ka xiga : **Waddo**
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 2036 Y
Bari waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8 Agoosto 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEGAANKA MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN C. GUULEED

L. 664

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Salaado Yuusuf Cusmaan ay soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 10.1.78 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga : **Waddo**
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lam. 835 Y
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 834 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 833 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 8 Agoosto 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEGAANKA MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN C. GUULEED

L. 665

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Keyra Xaaji Cabdi ay soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 13.5.78 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lam. 888 Y
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 689 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 685 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 8 Agoosto 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalnaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
—NAADO DHUL—

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Saalax Macalin uu soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamaı, maalintii taariikhdu ahayd 11.6.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 2700 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
Bari waxaa ka xiga : Waddada ka timid N. U.
Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 8 Agoosto 1978
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 667

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Safiya Sheekh Nuur Cabdullaahi ay soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 14.6.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Reegtangolar Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 800 Cq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —
Waqooyi waxaa ka xiga : Gal. lam. 336/58
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 48/58
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 1266/59
Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 8 Agoosto 1978
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
—NAADO DHUL—

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Xaaji Dagaal uu soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 13.5.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna waa 20X 30 kuna fadhiya 600 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lam. 630 Y
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 627 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 631 Y

Qofkii daneynayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu qoray Buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8 Agoosto 1978
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 669

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Timira Maxamuud Cabdi ay soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degkaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 20.6.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Reegtangolar Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lam. 1059 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 1058 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 1063 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 8 Agoosto 1978
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaawa Nuur Cusmaan ay u soo qoratay arj waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta maalintii taariikhdu ahayd 15-12-76, ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Retangolar Addimihiisuna waa 20X30 Kuna fadhiya 600 Mq.

— SOODHIMISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lam. 1010 Y
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 2009 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 1013 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 8 Agoosto 1978.

INJ. Cabdikariin Cige Guuleed
Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta

L. 671

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**WAAXDA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALOOYINKA**
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Axmed Maxamed uu soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 14.5.77 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Retangolar Addimihiisuna waa 20X30 Kuna fadhiya 600 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lam. 903 Y
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 900 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 904 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 8 Agoosto 1978.

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & MAGAALAYNTA.
INJ. Cabdikariim C. Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
**NAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulqaadir Maxamuud Maxamed uu soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 9-1-78, uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Retangolar Addimihiisuna waa 20X30 Kuna fadhiya 600 Mq.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

Waqooy-i waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lam. 623 Y
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 626 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 622 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 8 Agoosto 1978.

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 673

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynyaa in Jaalle Safiya Axmed M. Maxamuud ay u soo qoratay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 10.4.77 ay ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Retangolar Addimihiisuna waa 20X30 Kuna fadhiya 600 Mq.

SOODIMIHIISUNA WAA SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lam. 906 Y
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 905 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 909 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga

Muqdisho, 8 Agoosto 1978.

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 674

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Shesim Suber uu soo qortay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 11.5.78, uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Retangolar Addimihiisuna waa 20X30 Kuna fadhiya 600 Mq.

— SOODHIMISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lam. 877 Y
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lam. 876 Y
Bari waxaa ka xiga : Dhul Lam. 880 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 8 Agoosto 1978.

—AGAASIMAHA WAAXDA SH. DEG. MAGAALAYNTA—
INJ. CABDIKARIIN C. GUULEED

L. 675

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY : waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L. 9.9.65, N. 2; lumidda

Jeega wareeg L. 206482 oo ku qoran lacag dhan Sh.so. 5.900, Bangiga ganacsiga iyo keydka L. 2aad.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegga wareeg ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta Dekreetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeega cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Cabdi Maxamuud Cabdi ama qof isla asga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddo 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay:-

Muqdisho, 29.11.79

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

W.S. (Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 676

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY : waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L. 9.9.65, N. 2; lumidda

Jeega wareeg L. 2341 oy ku qoran tahay di Shs. so. 24.000 Bangiga ganacsiga iyo keydka L. Afgooye

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiio Jeegga wareeg ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeega cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Khadiija Caabe Odowaa ama qof illa asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddo 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay:-

Muqdisho, 30.11.78

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

W.S. (Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 677

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY : waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L. 9.9.65, N. 2; lumidda Buugga Keydka L. 499 oy ku qoran tahay di Sh.so. 10.600

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buug Kaydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buug cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Faaduma Faarax Cawaale ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddo 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay:-

Muqdisho, 1.11.78

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

W.S. (Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 677/Bis

## MAXKAMADDA GOBLKA BANAADIR

## GUDOOMIYAHA M. GOBALKA BANAADIR

MARKUU ARKAY :waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiiska

HADDUU ARKAY : qod. 69 9.9.65, N.2; lumidda Buug Keyd Lr. 10.827, kuan qoran tahay lacag dhan Sh.so. 3.144 Bangiga Ganacsiga Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad.

## WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buug Keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

## WAXAA LA CODSANAYAA

In Buug cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Yaxye Cumar Mardhuuf ama qof isla asaga ka sita Wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudda 30 maalmood ah ee aan kór ku soo sheegnay.

Muqdisho, 13.11.78

GUDDOOM. MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
(Dr. CABDULLAHI MAXAMED MAAX)